**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**

**Sharciga Codsiga Xogta Marka Xogtu Adiga Kugu Saabsan Tahay (Sharciga Xogta Muwaadinka)**

Shuruudaha Xeerka Minnesota §13.025 iyo §13.03 ayaa dhigaya dukumeentigan**.**

## Xogta Kugu Saabsan

Sharciga Hab-raaca Xogta Dawladda ee Minnesota (Minn. Stat. §13) wuxuu siinayaa qof kasta iyo hay'ad kasta xuquuqo muhiim ah marka hay'ad dowladeed ay ururiso, samayso, ama kaydiso xog dowladeed oo iyaga ku saabsan. "Xog dowladeed" waxaa loola jeedaa dhammaan macluumaadka la diiwaan geliyey ee Xafiiska Tacliinta Sare (OHE) uu sameeyay, ururiyey, keydiyey, ama hayay si uu shaqadiisa u qabto. Dukumeentigan wuxuu sharxayaa xuquuqda aad leedahay iyo sida aad u adeegsan karto.

## Kala-soocidda Xogta Kugu Saabsan (Shaqsi ahaan ama Hay'ad ahaan)

Shaqsi waa bini'aadam nool. Xogta aan dadweynaha loo oggolaan oo ku saabsan shaqsi waxaa lagu kala saaraa mid gaar ah (private) ama mid sir ah (confidential). *Hay'ad* waxay noqon kartaa shirkad, korporayshan, qayb ganacsi, ama nooc kale oo daneeye ah oo aan ahayn qof. Xog aan dadweynaha loo oggolaan oo ku saabsan hay'ad waxaa lagu kala saaraa mid aan dadweynaha loo oggolayn (nonpublic) ama mid aan la shaacin ee la ilaaliyo (protected.

- **Xog dadweyne:** Sharcigu wuxuu u arkaa dhammaan xogta inay xog dadweyne yihiin haddii aan sharci dowladeed ama federaal si cad u sheegin in xogtaas aan loo oggolaan dadweynaha. OHE waa inay siisaa xogta dadweynaha qof kasta oo codsada; ma kala duwana cidda codsanaysa ama sababta loo codsanayo.
- **Xog aan dadweynaha loo- oggolaan:** Waa erey guud oo tixraacaya xog gaar ah (private), aan dadweyne ahayn (nonpublic), sir ah (confidential), ama la ilaaliyo oo aan la shaacin (protected nonpublic), sida hoos lagu qeexay.
- **Xog gaar ah / aan dadweyne ahayn:** Xog gaar ah waxay khusaysaa qof; xog aan dadweyne ahayn waxay khusaysaa hay'ad. OHE dadweynaha ma siin karto xogta noocan ah, laakiin adiga ayaa xaq u leh inaad hesho haddii xogtu adiga kugu saabsan tahay. Xogta noocan ah waxaa sidoo kale heli kara qof aad oggolaansho siisay, shaqaale dowladeed ama qandaraasle shaqadoodu u baahan tahay inay xogta helaan, iyo cid kale oo sharci ama amar maxkamadeed loogu oggolaaday.
- **Xog sir ah / xog la ilaaliyo oo aan la shaacin:** Xog sir ah waxay khusaysaa qof; xog la ilaaliyo oo aan la shaacin waxay khusaysaa hay'ad. Xogtan waxay leedahay ilaalinta ugu badan ee qofka ama hay'adda, waxaana jira xaalad aan adigaba xaq u lahayn inaad hesho xitaa haddii xogtu adiga ku saabsan tahay. OHE waxay la wadaagi kartaa xogta noocan ah shaqaale dowladeed ama qandaraasle shaqadoodu awgeed u baahan inay xogta helaan, iyo cid kale oo sharci ama amar maxkamadeed loogu oggolaaday**.**

OHE waxay ururin kartaa oo kaydin kartaa xogta kugu shaqsi ahaan ama hay'ad ahaan marka ay heysato ujeeddo sharci ah, waana inay u kaydiso in si fudud loo heli karo. Xogta kugu saabsan waxaa lagu kala saaraa dadweyne, gaar ah, ama sir ah, iyadoo kala-sociddan ay go'aamiso cidda sharci ahaan xaqa u leh inay aragto xogta.

**Xuquuqdaada hoos timaada Sharciga Hab-raaca Xogta Dawladda ee Minnesota**

Haddii OHE ay hayso xog kugu saabsan, oo lagaa aqoonsan karo xogtaas, waxaa lagu magacaabaa Qofka xogtu khusayso (data subject). OHE waxay ururin kartaa oo kaydin kartaa oo keliya xogta ku saabsan Qofka xogtu khusayso ee ay u baahan tahay si ay u maamusho barnaamijyadeeda. Qofka xogtu khusayso, waxaad leedahay xuquuqdan:

**Helitaanka xogta kugu saabsan:** Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dhammaan xogta dadweynaha iyo tan gaar ahaaneed ee OHE hayso adiga oo aan wax lacag ah laga qaadin. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqullo ka mid ah xogta dadweynaha iyo tan gaar ahaaneed ee kugu saabsan, balse Sharciga Hab-raaca Xogta wuxuu OHE u oggolaanayaa inay lacag ka qaaddo nuqullada. Ka hor intaadan dalban nuqul, waad arki kartaa xog kasta oo aad rabto. Haddii aad weydiiso, OHE waxay kuu sheegi doontaa haddii ay hayso xog kugu saabsan iyo in xogtaas ay tahay mid dadweyne, gaar ah, ama sir ah.

- Waalid ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad aragto oo aad hesho nuqullo ka mid ah xogta dadweynaha iyo tan gaar ahaaneed ee ku saabsan carruurtaada da'doodu ka yar tahay 18 sano. Ilaaliye sharci ahaan loo magacaabay, waxaad xaq u leedahay inaad aragto oo aad hesho nuqullo ka mid ah xogta dadweynaha iyo tan gaar ahaaneed ee ku saabsan qofka aad ilaalinta u haysid.
- Carruurta ka yar 18 sano waxay xaq u leeyihiin inay OHE ka codsadaan in xogta gaar ahaaneed ee ku saabsan iyaga aan loo oggolaan waalidkood ama ilaaliyahooda. Si codsiga noocaas ah loo sameeyo, ilmaha waa inuu codsiga ku soo gudbiyaa qoraal, isaga oo ku daraya sababaha ay tahay in OHE ka diido waalidka ama ilaaliyaha helitaanka xogta. Ilmaha waa inuu codsigan u diro Sarkaalka U Hogaansanaanta Hab-raaca Xogta isagoo adeegsanaya boosto, fakis, ama iimayl, isaga oo adeegsanaya isla macluumaadka lagu bixiyay qaybta xiriirrada ee bogga 5. OHE waxay go'aanka kama dambaysta ah ka gaari doontaa codsiga ilmaha iyadoo ku salaynaysa danta ugu wanaagsan ee ilmaha.
- Qof qaangaar ah oo leh ilaaliye sharci loo magacaabay wuxuu xaq u leeyahay inuu OHE ka codsado in xogta gaar ahaaneed ee ku saabsan isaga aan loo oggolaan ilaaliyaha. Si codsiga noocaas ah loo sameeyo, muwaadinka xogta waa inuu codsiga ku soo gudbiyaa qoraal, isaga oo ku daraya sababaha ay tahay in OHE ka diido ilaaliyaha sharci loo magacaabay helitaanka xogta. Qofka waa inuu codsigan u diro Sarkaalka U Hogaansanaanta Hab-raaca Xogta isagoo adeegsanaya boosto, fakis, ama iimayl, isaga oo adeegsanaya isla macluumaadka lagu bixiyay qaybta xiriirrada ee bogga 5. OHE waxay go'aanka kama dambaysta ah ka gaari doontaa codsiga iyadoo ku salaynaysa danta ugu wanaagsan ee qofka xogtu khusayso.

**Marka OHE ay kaa ururiso xog:** Marka hay'adda laguu magac daray ay kaa codsato xog gaar ah ama xog sir ah oo kugu saabsan, waa inay ku siisaa ogeysiis ku saabsan habraacyada ilaalinta xogtaada. Ogeysiiskaas wuxuu sharxayaa waxa hay'addu ka samayso xogta ay kaa ururiso. Badanaa, xogta waxaa loo isticmaali karaa oo keliya ama loo sii deyn karaa siyaabaha lagu qeexay ogeysiiskaas. Haddii loo baahdo in xogtaada gaar ahaaneed loo isticmaalo ama loo sii daayo si ka duwan tan ogeysiiska ku jirta, ama haddii aad adigu codsato in xogta loo gudbiyo qof kale, waxaa lagaa dalban doonaa oggolaansho

qoraal ah. Oggolaanshahan waxaa lagu magacaabaa oggolaansho xog-ogaal ah.

**<u>Ilaalinta xogta kugu saabsan:</u>** Sharcigu wuxuu ku waajibinayaa hay'adda inay ilaaliso xogtaada gaar ahaaneed iyo xogta sirta ah ee kugu saabsan, adiga oo ah qofka xogta laga leeyahay. Hay'addu waxay dejisay habraacyo iyo ilaalin ku habboon si loo hubiyo in xogtaada lagu hayo si ammaan ah. Haddii ay dhacdo in la ogaado in amniga xogta la jebiyey oo qof aan loo fasixin uu helo xogtaada gaar ahaaneed ama xogta sirta ah, waxaa lagu ogeysiin doonaa sida uu sharcigu dhigayo.

**<u>Marka xogta kugu saabsan ay noqoto mid khaldan ama aan dhammaystirnayn:</u>** Waxaad xaq u leedahay inaad ka dooddo inay sax tahay iyo/ama dhammaystirnaanta xogta dadweynaha iyo tan gaar ahaaneed ee adiga kugu saabsan. Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aanka lagaa gaaray, adiga oo raacaya nidaamka uu sharcigu dhigayo. Haddii aad tahay ilmo ka yar 18 sano, waalidkaaga ama ilaaliyahaaga ayaa xaqa u leh oo diidi kara xogta adiga kugu saabsan.

**Sida loo Codsado Xog Kugu Saabsan**

Si aad u aragto ama u dalbato nuqullo ka mid ah xogta hay'addu kaydisay ee adiga kugu saabsan, ama ku saabsan carruurtaada ka yar 18 sano, ama qof aad u tahay ilaaliye sharci loo magacaabay, waa inaad codsigaaga u dirtaa Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta. **Waa in codsigaagu ahaadaa mid qoraal ahaan ah**. Iimaylkana waxaa loo aqbalaa qoraal. Marka aad gudbiso codsigaaga, waxaad filan kartaa jawaab lagu xaqiijinayo helitaanka codsigaaga laba maalmood oo shaqo gudahood. Haddii aadan jawaab helin muddo laba maalmood oo shaqo ah, la xiriir Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta adigoo wacaya 651-642-0567, kadibna riixaya 9 dabadeedna 0.

Waxaad isticmaali kartaa foomka codsiga xogta ee ku yaalla bogga 6, laakiin kuma khasbanid inaad isticmaasho foomkaas. Haddii aadan dooran inaad isticmaasho foomka codsiga xogta, codsigaagu waa inuu ka koobnaadaa:

- In aad caddeyso inaad codsanayso xog hoos timaadda Sharciga Hab-raaca Xogta, adiga oo ah qofka xogta ay ku saabsan tahay, si aad u hesho xog kugu saabsan.
- Aad rabto sharaxaad cad oo ku saabsan xogta.
- In aad rabto oo keliya inaad xogta aragto, inaad hesho nuqul, ama inaad rabto labadaba.
- Macluumaad caddeynaya inaad tahay qofka xogta ay ku saabsan tahay, ama waalidka/ilaaliyaha sharci ee qofka xogta ay lu saabsan yatahay haddii aad codsanayso xog gaar ah oo aan dadweynaha loo oggolaan.

Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu u baahan yahay caddeyn aqoonsigaaga ka hor inta uusan ka jawaabin codsigaaga ku saabsan xog gaar ah. Mid ka mid ah dukumeentiyada soo socda ayaa noqon kara caddeyn aqoonsi: liisanka darawalnimada ee gobolka, kaarka aqoonsiga ciidamada, baasaboorka dalkaga, kaarka baasaboorka dalkaga, kaarka aqoonsiga gobolka ama qaranka qabiilka, ama haddii aad tahay ilmo ka yar 18 sano, kaarka aqoonsiga iskuulka. Haddii aad tahay waalid ama ilaaliye sharci ee ilmo ka yar 18 sano,

Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu u baahan yahay kaarka aqoonsiga sawirka leh ee ansax ah (mid ka mid ah noocyada kor lagu sheegay) iyo nuqul la xaqiijiyey oo ka mid ah shahaadada dhalashada ilmaha, ama nuqul la xaqiijiyey oo ka mid ah dukumeenti caddeynaya xiriirka waalidka ama ilaaliyaha iyo ilmaha, sida amar maxkamadeed, heshiis korsasho, ama qoraal caddeyn waalidnimo. Haddii aad tahay ilaaliye sharci ee qof qaangaar ah, Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu u baahan yahay kaarka aqoonsiga sawirka leh ee ansax ah (mid ka mid ah noocyada kor lagu sheegay) iyo nuqul la xaqiijiyey oo ka mid ah dukumeenti caddeynaya magacaabista ilaalin, sida amar maxkamadeed ama qoraal awood wakiil.

**Sida Xafiiska Tacliinta Sare uga Jawaabo Codsiga Xogta**

Marka aad gudbiso codsi, Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta wuxuu kuugu soo jawaabi doonaa laba maalmood oo shaqo gudahood, isaga oo xaqiijinaya in codsigaaga la helay oo dib loo eegayo. Jawaabta waxaa laguugu soo diri doonaa isla habka isgaarsiineed ee aad ku dirtay codsigaaga, haddii aanad codsiga ku sheegin hab kale oo aad rabto in lagugu soo jawaabo. Haddii aadan jawaab ka helin laba maalmood oo shaqo gudahood, waa inaad la xiriirtaa Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta adigoo wacaya 651-642-0567, kadibna riixaya 9 dabadeedna 0.0

- Haddii aan si cad loo fahmin xogta aad codsanayso, Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu kaa codsan doonaa faahfaahin dheeraad ah.
- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare aanu haysan xogta, waxaa laguugu sheegi doonaa muddo toban maalmood oo shaqo gudahood.
- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare uu hayo xogta, laakiin xogtu tahay xog sir ah oo adiga kugu saabsan ama xog gaar ah/sir ah oo qof kale ku saabsan, waxaa laguugu sheegi doonaa muddo toban maalmood oo shaqo gudahood, iyadoo jawaabta lagu caddeynayo sharciyada gaarka ah ee sheegaya inaadan xogtaas heli karin.
- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare uu hayo xogta, xogtuna tahay xog dadweyne ama xog gaar ah oo adiga kugu saabsan, waxaa laguugu jawaabi doonaa muddo toban maalmood oo shaqo gudahood.
- Haddii xogta la xiriirta codsigaaga ay aad u badan tahay, Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu xogta ku siin karaa qaybo qaybo ilaa jawaabta oo dhan la dhameystiro.
- Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu uga jawaabi karaa codsigaaga isagoo mid ka mid ah tallaabooyinkan qaadaya:
  - Inuu kuu diyaariyo taariikh, waqti, iyo goob aad ku aragto xogta adiga oo aan lacag laga qaadin; ama,
  - Inuu ku siiyo nuqullo ka mid ah xogta muddo toban maalmood oo shaqo gudahood. Waxaad dooran kartaa inaad nuqullada ka soo qaadato ama laguugu soo diro boosto. Sidoo kale, haddii xogta lagu hayo qaab elektaroonig ah, Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu ku siin doonaa nuqullo elektaroonig ah haddii aad codsato.

Marka Xafiiska Tacliinta Sare uu ku siiyo fursad aad ku aragto xog kugu saabsan, xafiisku waajib kuma aha inuu mar kale ku tuso xogtaas muddo lix bilood gudahood ah, haddii aanay jirin muran ama haddii uusan Xafiiska Tacliinta Sare ururin ama samayn xog cusub oo kugu saabsan.[1] Sharciga Hab-raaca

[1] Iyadoo la raacayo shuruudaha FERPA haddii ay khusayso.

Xogtu ma waajibinayo Xafiiska Tacliinta Sare inuu abuuro ama ururiyo xog cusub si uu uga jawaabo codsiga xogta haddii uusan horey u haysan xogtaas, ama inuu bixiyo xog qaab ama nidaam gaar ah haddii aanu xogta ku hayn qaabkaas ama nidaamkaas. Haddii Xafiiska Tacliinta Sare uu aqbalo inuu abuuro xog si uu uga jawaabo codsigaaga, wuxuu kula shaqayn doonaa faahfaahinta codsigaaga, oo ay ku jiraan kharashka iyo muddada jawaabta.

Waxaad samayn kartaa codsiyo joogto ah oo ku saabsan xogta kugu saabsan. Codsiyada joogtada ah waa codsiyo xog ah oo laga yaabo inay u baahan yihiin jawaabo muddo dheer ah. Codsiyada joogtada ah waxay dhacayaan kadib saddex bilood, waxaana lagama maarmaan ah in dhammaan lacagaha loo baahan yahay la bixiyo dhammaadka muddada saddexda bilood ah, ka hor inta aan la cusboonaysiin codsiga joogtada ah.

**Kharashaadka Nuqul Sameynta ee Qofka xogtu khusaysо**

Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu ka qaadi karaa kharashka dhabta ah ee ku baxa sameynta nuqul xog kugu saabsan. Marka la go'aaminayo kharashka dhabta ah, Xafiiska Tacliinta Sare wuxuu ku daraa waqtiga shaqaalaha ee ku baxa sameynta iyo dirista nuqullada, kharashka qalabka lagu nuqulaynayo xogta (sida waraaq, CD, DVD, iwm), iyo kharashaadka dirista sida boostada haddii ay jirto. Kharashka waqtiga shaqaalaha waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la adeegsanayo mushaharka saacadda ee shaqaalaha ugu mushaharka yar ee awooda inuu shaqadaas qabto, oo lagu daray 20% faa'iidooyinka kale ee shaqaalaha. Dhammaan kharashaadka waa in la bixiyo ka hor inta aan Xafiiska Tacliinta Sare nuqul ka samayn dukumeentiyada ama aan lagu siin.

- Xafiiska Tacliinta Sare ma qaado kharash haddii la qiyaaso in kharashkaasi ka yar yahay $10.00.
- Xafiiska Tacliinta Sare ma qaado kharash si loo eego xogta ama loo kala saaro xogta dadweynaha iyo tan aan dadweynaha loo oggolaan.
- Marka xogtu ay ku saabsan tahay Qofka xogtu akhusayso, Xafiiska Tacliinta Sare ma qaado kharashka waqtiga lagu raadinayo ama lagu soo saarayo xogta.

**Macluumaadka Xiriirka ee Hab-raaca Xogta**

**U dir codsi xog raadin ah adigoo adeegsanaya:**

Boosto:
Data Practices Compliance Official
1450 Energy Park Drive, Suite 350
St. Paul, MN 55108-5227

Fakis: 651-642-0675, ku socodsii Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta, adigoo ku qoraya bogga daboolka "Codsi Xog – muwaadin xog".

Iimayl: Ku socodsii Sarkaalka U-hoggaansanaanta Hab-raaca Xogta, adigoo ku qoraya ciwaanka iimaylka "Codsi Xog – muwaadin xog" qaybta mowduuca, kuna soo dir ciwaanka datarequest.ohe@state.mn.us

**Responsible Authority ( Mas'uulka Xogta)**
Dennis Olson Jr., Commissioner ( Komishanka)

**Data Practices Compliance Official (Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta)**
Andrew Wold, General Counsel ( La-Taliyaha Guud)

**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**
**Foomka Codsiga Xogta Dadweynaha**

| | | |
|---|---|---|
| **Magaca:** | **Taariikh:** | |
| **Cinwaanka:** | | |
| **Magaalada:** | **Gobalka:** | **Lambarka Boostada:** |
| **Lambarka Taleefoonka:** | **Iimayl:** | |
| | | |

Fiiro Gaar ah: Looma baahna inaad bixiso macluumaadka kor ku xusan. Si kastaba ha ahaatee, Xafiiska Tacliinta Sare laga yaabee inuusan awoodin inuu xaqiijiyo aqoonsigaaga si uu kuugu siiyo xog gaar ah haddii aan la haysan macluumaad lagugu soo xiri karo ama nooc aqoonsi oo loo baahan yahay.

Fadlan ku sharax sanduuqa hoose xogta aad rabto in Xafiiska Tacliinta Sare ku siiyo:

☐ Kormeer ☐ Nuqullo ☐ Labadaba-Kormeer iyo nuqullo

Sharciga Minnesota § 13.04, farqaddiisa 3, wuxuu siinayaa Xafiiska Tacliinta Sare awood uu ku dalaco kharashyada lagu daboolayo bixinta nuqullada xogta. Lacagta waa in la bixiyo ka hor inta aan la helin nuqullada xogta.